**War** saxaafadeed

# Miisaaniyadda 2025: La tacaalidda Caqabadaha Caafimaadka iyo Waxbarashada

Miisaaniyadda 2025: La Tacaalidda Caqabadaha Kororka Degdegga ah ee Dadweynaha iyada oo Lagu Maalgelinayo Caafimaadka iyo Waxbarashada

Miisaaniyadda 2025 waxay sii waddaa maalgelinta caafimaadka iyo waxbarashada si wax looga qabto kororka degdegga ah ee dadka Alberta.
$28 bilyan oo rikoor ah ayaa lagu maalgelinayaa nidaamka daryeelka caafimaadka, iyadoo la hubinayo in dhammaan reer Alberta ay helaan adeegyo tayo sare leh oo lagu kalsoonaan karo, meel u dhow guryahooda. Miisaaniyadda waxay taageertaa qorshaha dowladda ee bixinta daryeel gaar ah oo la beegsaday afar aag oo muhiim ah:
Daryeelka degdegga daryeelka aasaasiga ah daryeelka caafimaadka maskaxda daryeelka waara

$9.9 bilyan – miisaaniyaddii ugu sarraysay ee hawlgalka waxbarashada ee Alberta, laga bilaabo xannaanada ilaa fasalka 12-aad. Miisaaniyadda 2025 waxay gacan ka geysan doontaa:

Shaqaaleysiinta kumannaan macallimiin iyo shaqaale taageero oo dheeraad ah
Yaraynta cabbirka fasallada
Horumarinta taageerada waxbarasho ee ardayda baahiyaha gaar ah leh
• $2.6 bilyan ayaa lagu maalgelinayaa dhismaha iyo horumarinta xarumaha waxbarashada saddex sano gudahood – koror 23.9% ah marka la barbar dhigo miisaaniyaddii hore. Tani waxaa ka mid ah $225 milyan oo lagu dardargelinayo qorsheynta iyo naqshadeynta 30 iskuul oo cusub, 5 iskuul oo beddel ah, 3 mashruuc oo casriyeyn ah, 3 mashruuc oo iskuullo charter ah, iyo fasallo ku-meel-gaar ah
Iskuuladaan waxaa dheer 22 iskuul oo maraya marxaladdii dhismaha ee barnaamijka School Construction Accelerator Program, kaas oo la bilaabay dayrtii 2024
28 mashruuc kale ayaa ku jira marxalado kala duwan oo dhismo ah
Dowladda Alberta waxay ka go’an tahay dhisidda iskuullo cusub oo si weyn loogu baahan yahay, iyadoo qorsheyneysa in 100 iskuul oo cusub iyo kuwa dib loo hagaajiyey – oo dabooli doona qiyaastii 200,000 boos oo arday – la dhameystiro 7-da sano ee soo socota.

“Dhammaan reer Alberta waxay mudan yihiin inay helaan adeegyada ugu wanaagsan ee nidaamyada caafimaadka iyo waxbarashada ay bixiyaan. Alberta waxay sii kordheysaa maadaama qoysas badan ay doortaan inay halkaan guryo ka dhigtaan. Miisaaniyadda 2025 waxay ka jawaabi doontaa baahiyaha sii kordhaya ee gobolka,

Classification: Public

iyadoo weli sii wadaysa bixinta adeegyada ay reer Alberta ku kalsoon yihiin oo ay ku tiirsan yihiin.”

*Nate Horner, Madaxweynaha Guddiga Kaydka iyo Wasiirka Maaliyadda*

## Miisaaniyadda 2025: Xoojinta daryeelka daafimaadka

Miisaaniyadda 2025 waxay taageereysaa qorshaha dowladda ee dib u habeynta nidaamka daryeelka caafimaadka si loo hubiyo in reer Alberta ay helaan daryeel sax ah, xilli iyo goob ku habboon baahidooda.

Maalgelinta caafimaadka ee Miisaaniyadda 2025 waxaa ka mid ah:

- $644 milyan oo loogu talagalay daryeelka aasaasiga ah (Primary care), si qof walba Alberta ugu xirmo koox daryeel caafimaad oo joogto ah, loona fududeeyo helitaanka dhakhaatiirta qoyska iyo xirfadlayaasha caafimaadka ee safka hore. Tan waxaa ka mid ah $20 milyan oo lagu taageerayo shaqada kalkaaliyeyaasha caafimaadka ee takhasuska leh.
- $4.6 bilyan oo loogu talagalay daryeelka degdegga ah (Acute care), si loo kordhiyo adeegyadii hore, loona wanaajiyo nidaamka daryeelka degdegga ah ee isbitaallada, xarumaha daryeelka degdegga ah, xarumaha qalliinka gaarka ah, iyo xarumo kale oo caafimaad.
- $45 milyan oo loogu talagalay barnaamijyada caafimaadka dadka asaliga ah (Indigenous health initiatives) saddex sano gudahood, si wax looga qabto sinnaanta la’aanta caafimaadka loona xoojiyo fursadaha daryeel caafimaad ee kala duwan.
- $7 bilyan oo loogu talagalay mushaarka iyo horumarinta dhakhaatiirta, oo ay ku jirto $15 milyan oo loogu talagalay qorista iyo haynta dhakhaatiirta.
- $1.9 milyan oo loogu talagalay daawooyinka iyo dheefaha caafimaadka oo ay ku jirto barnaamijka daawada waayeelka, kaas oo ka faa’iideeya in ka badan 700,000 waayeel ah.
- $1.7 bilyan oo loogu talagalay daryeelka qabatinimada (addiction) iyo caafimaadka dhimirka, si kor loogu qaado taageerada dib u soo kabashada iyo fayo-qabka dadka Alberta. Tan waxaa ka mid ah hirgelinta qaab-dhismeedka cusub ee compassionate intervention framework taageerada Recovery Alberta dhisidda xarumaha dib-u-soo kabashada ee cusub ballaarinta fasallada caafimaadka maskaxda si ardayda baahiyaha caafimaadka dhimirka ee adag leh ay u helaan daryeel gaar ah.
- $3.8 bilyan oo loogu talagalay Assisted Living Alberta, oo ah hay’adda cusub ee daryeelka caafimaadka waara ee gobolka, taasoo bixisa daryeel dhameystiran oo caafimaad iyo bulsho ah, oo ay ku jiraan daryeel guriyeed, daryeel bulsho, adeegyada bulshada

Maalgelinta kaabayaasha caafimaadka miisaaniyadda 2025 waxay ku bixineysaa $3.6 bilyan saddex sano gudahood si loo dhiso xarumo caafimaad oo cusub, loo ballaariyo isbitaallada jira, loona hagaajiyo adeegyadii hore. Tani waxaa ka mid ah:

- $769 milyan oo lagu taageerayo isbeddelka daryeelka waara, kor loogu qaadayo tirada guryaha la taageero ee la dego (assisted living spaces) iyo casriyeynta guryaha daryeelka ee Alberta.
- $265 milyan oo loogu talagalay Barnaamijka Qalliinka Alberta (Alberta Surgical Initiative), si loogu ballaariyo, dib loogu hagaajiyo, loona dhiso qolal cusub oo qalliinka lagu sameeyo, si loo kordhiyo awoodda qalliinka.
- $207 milyan oo loogu talagalay dhisidda xarumo caafimaad oo khaas ah (compassionate intervention facilities) si loogu adeego bukaanada u baahan daryeel gaar ah.
- $168 milyan oo maalgelin cusub ah si kor loogu qaado adeegyada baaritaanka iyo ogaanshaha cudurrada (diagnostic capabilities) guud ahaan gobolka.
- $148 milyan oo lagu sii wado dhisidda Recovery Communities. Wadar ahaan 11 xarumood, oo ay ku jiraan 5 xarumood oo dadka asaliga ah loogu talagalay, ayaa la ansixiyay, iyadoo Calgary Recovery Community lagu wado in la furo 2025. Ilaa hadda, 200 sariirood oo cusub oo loogu talagalay daaweynta qabatinimada ayaa shaqeynaya Red Deer, Lethbridge iyo Gunn.
- $60 milyan saddex sano gudahood si loogu iibsado gawaari cusub oo gurmad degdeg ah (EMS ambulances), loo casriyeeyo gawaariha jira, loona iibsado qalab dheeraad ah.

"Miisaaniyadda 2025 waxay xoojinaysaa ballanqaadkeenna dib u habeynta nidaamka caafimaadka Alberta, hagaajinta helitaanka adeegyada caafimaadka ee reer Alberta, iyo taageeridda shaqaalaha safka hore. Iyada oo maalgelin ballaaran lagu samaynayo daryeelka aasaasiga ah, mashaariicda kaabayaasha, caafimaadka dadka asaliga ah, iyo adeegyada degdegga ah, waxaan hubinaynaa in reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin, xilliga iyo goobta ay ugu baahan yihiin."
*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaad*

"Alberta waa hoggaamiye caalami ah oo dhanka daaweynta iyo dib-u-soo kabashada qabatinimada, iyada oo ay horseed u tahay Qaabka Dib-u-soo Kabashada Alberta (Alberta Recovery Model). Waxaan sii wadeynaa ballanqaadkeenna ku aaddan maalgelinta fayo-qabka reer Alberta iyo bixinta adeegyada lagama maarmaanka u ah dadka la tacaalaya xanuunnada dhimirka ama qabatinimada, si ay dib ugu dhistaan noloshooda. Sidoo kale, waxaan ka go'an ballaarinta helitaanka adeegyada daaweynta, iyada oo la dhisayo xarumo cusub guud ahaan gobolka."
*Dan Williams, Wasiirka Caafimaadka Maskaxda iyo Qabatinimada*

# Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Waxbarashada K-12 (Xannaanada ilaa Fasalka 12-aad)

Reer Alberta waxay mudan yihiin waxbarasho heer caalami ah, haatan iyo mustaqbalka. Miisaaniyadda 2025 waxay ku bixinaysaa $9.9 bilyan qarash hawlgal ah sannadka 2025-26, taasoo ah koror 4.5% ah marka loo eego saadaasha saddex-biloodlaha ee Miisaaniyadda 2024-25. Maalgelinta Muhiimka ah ee Waxbarashada K-12.

- $54 milyan sanad-maaliyadeedka 2025-26, iyo $348 milyan oo dheeraad ah labadii sano ee xiga, si wax looga qabto kororka ardayda isdiiwaangelineysa.
- $55 milyan oo koror ah sannadka 2025-26, iyo $94 milyan sanad walba labadii sano ee xiga, si wax looga beddelo qaabka maalgelinta maamulka dugsiyada, loogana dhigo mid waara oo si hagaagsan ula jaanqaada kobaca ardayda.
- Wadar ahaan, ku dhowaad $1.1 bilyan ayaa la bixin doonaa saddexda sano ee soo socota si wax looga qabto koboca waxbarashada iyo in la shaqaaleysiiyo in ka badan 4,000 macallin iyo shaqaale taageero oo dheeraad ah.
- In ka badan $1.6 bilyan oo lagu taageerayo ardayda qaba baahiyo waxbarasho oo gaar ah, iyo ardayda u baahan caawimaad dheeraad ah.
- $55 milyan sanad-maaliyadeedka 2025-26, taasoo ah koror 20% marka la barbar dhigo sannadkii hore, si maamulka dugsiyadu u kordhiyaan shaqaalaha iyo taageerada fasallada adag, si ardaydu u helaan feejignaan iyo taageero dheeraad ah.
- $389 milyan saddexda sano ee soo socota si kor loogu qaado heerka maalgelinta ee dugsiyada, taasoo dabooli doonta, kharashaadka kororka ku yimid dayactirka xarumaha waxbarasho, kharashaadka lama huraanka ah sida caymiska iyo adeegyada Tamarta bixinta barnaamijyo iyo adeegyo waxbarasho oo dheeraad ah

Miisaaniyadda 2025 waxay ujeeddadeedu tahay in ardayda Alberta ay helaan waxbarasho tayo sare leh, loona abuuro jawi waxbarasho oo adag oo taageera kobaca waxbarasho ee mustaqbalka.

“Miisaaniyadda 2025 waxay bixisaa xalal wax ku ool ah oo loogu talagalay caqabadaha ay la kulmayaan nidaamka waxbarashada. Waxaan sameyneynaa maalgelin cusub si aan u shaqaaleysiino macallimiin dheeraad ah, u dhisno iskuullo badan, uguna suurtagelino ardayda da’da yar inay helaan bilow adag oo adag. Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan soo bandhigo miisaaniyad xooggan oo waxbarasho oo loogu talagalay reer Alberta, waxaana hubaa inay ka caawin doonto nidaamkayaga waxbarasho inuu sii ahaado mid heer caalami ah.

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Wabarashada*

Classification: Public

Maaddaama Alberta ay sii waddo soo jiidashada qoysaska, shaqaalaha, iyo ganacsiyada, maalgelin istiraatiiji ah oo lagu sameeyo caafimaadka iyo waxbarashada waxay wax ka qaban doontaa baahiyaha hadda jira, isla markaana waxay dhidibada u taagi doontaa horumar waara oo mustaqbalka ah.

Miisaaniyadda 2025 waxay wax ka qabatay caqabadaha horyaalla Alberta iyadoo sii waddo maalgelinta waxbarashada iyo caafimaadka, hoos u dhigaysa canshuuraha qoysaska, iyo diiradda saareysa kobcinta dhaqaalaha.

## Xogta la xiriirta

- Miisaaniyada 2025 (Budget 2025)
- Qaabka Dib-u-soo Kabashada Alberta (Alberta Recovery Model)

## Wararka la xiriira

- Miisaaniyadda 2025: La Tacaalidda Caqabadaha (Budget 2025: Meeting the challenge (Feb 27, 2025)
- Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Mustaqbalka Alberta (Budget 2025: Investing in Alberta's future (Feb 27, 2025)

### Warbaahinta kala duwan

- Daawo Khudbadda Miisaaniyadda (Watch the Budget address)
- Daawo Shir Jaraa'idka (Watch the news conference)
- Dhageyso Shir Jaraa'idka (Listen to the news conference)